

XEERARKA QOLKA DHARDHAQISTA

- Qolka dhardhaqista waxad ku dhaqan kartaa ama ad ku maydhan kartaa kaliya dharka gurigaagu leeyahay
- In roogag ad ku maydhato qasaaladaha qolka dhardhaqista waa mamnuuc bilaa shardi ah! (roogagga culus way jabinayaan qasaaladda)
- Wakhtiga la isticmaalayo qolka dhardhaqista waa in wakhti hore laga qabsadaa buugga yaalla qolka dhardhaqista ee wakhtiga lagu qorto. Si waadix ah ugu qor buugga magacaaga ama tirada gurigaaga.
- Dhar uu qof kale leeyahay lagama saari karo qasaaladda, qalajisada ama qolka dhardhaqista isaga oo wakhtigiisu u socdo.
- Haddii ad rabto inaad baajiso wakhti ad qabsatay si waadix ah ugu calaamadi buuga wakhtiga laga qabsado si qofkii kale ee u baahan uu wakhtigaas u isticmaali karo.
- Ha taaban badhamada laga shido korontada ama badbaadada ah ama qasabadaha, waayo wakhti kasta waxay ku hagaagsanyihiin qaab loo isticmaali karo. Haddii ad laakiin u dareento in aynan qasaladaha dab ama biyo ku soconin waxad hubisaa in ay kor u taaganyihiin badhamadu.
- Dharka waa inaad ka qaadataa qolka dhardhaqista ama qolka lagu waro isla marka ad ka dhamaysato danta ad ka lahayd. Qolalka looguma talo galin in lagu kaydsado dharka.
- Albaabada qasaaladda iyo qalajisada iyaga oo furan katag kadib markaad isticmaasho.
- Qof kasta oo qolka dhardhaqista isticmaalaa waa in uu ka warhayaa in uu qolka iyo qalabka yaala nadiifiyo marka uu isticmaalo kadib.